



Ku soo dhawoow soo-saaridda labbaad ee Warsidaha Horumarinta Xirfadeed "Professional Development (PD);" warside saddexdii biloodba mar soo baxa oo loogu talagalay bulshada barashada hore ee Washington. Hadafka laga leeyahay warsidaha waa in uu kugu wargeliyo dhammaan howlaha waaweyn ee ku saabsan Horumarinta Xirfadeed.

Warsidahan...

- [WAC ee La Cusbooneysiyeey: Shahaadooyinka Shaqaalaha iyo Horumarinta Xirfadeed](#)
- [Dhinaca Bulshada](#)
- [Bartayaasha Labbada Luuqadood Ku Hadla \(DLLs\)](#)
- [Shirweynihii Barashada Hore ee Qabiilka, 30-31 Maajo, 2019](#)
- [RBPD: Horumarinta Xirfadeed ee Xiriirka-Ku Saleysan](#)
- [Kaydi Xogta loogu talagalay Fursadaha Barasho](#)
- [Warsidayaasha iyo Shirarka Fiidiyowga ee Sida Tooska ah Baraha Internet-ka Looga Tebiyo \(Webinars\)](#)
- [Sidee Nahay?](#)

WAC ee La Cusbooneysiyeey: Shahaadooyinka Shaqaalaha iyo Horumarinta Xirfadeed

Quusida Fursadaha Barashada

Bishii hore, kooxda PD ayaa waxaa ay ku soo bandhigtay Olympia, Bellevue, Pasco iyo Spokane shuruudaha horumarinta xirfadeed iyo tababarka ee la cusbooneysiyeey ee Xeerka Maamulka Washington (WAC) ee Jaan-gooyoyinka Tayada Aasaasiga ah ee Barnaamijyada Barashada Hore ([Cutubka WAC ee 100-300](#)). Soo bandhigyadan waxaa ay ka hadleen qaybaha WAC [0100](#), [0105](#), [0106](#) iyo [0107](#).

Booqo bogga [Dhacdooyinka Iswaafajinta Jaan-](#)



[gooyooyinka iyo Fursadaha Barashada](#) ee ku yaalla mareegtada DCYF si aad u hesho kheyraadka iyo fiidiyowiyada wacyigelinta iswaafajinta jaan-gooyooyinka iyo Quusida Fursadaha Barashada ee soo socda.

Halka Laga Helo Xeerarka WACs ee Shahaadooyinka Shaqaalaha iyo Horumarinta Xirfadeed

[Xeerka WAC 0100 Shahaadooyinka Shaqaalaha Guud](#): waxaa uu sharxayaa shahaadooyinka iyo mas'uuliyadaha door kasta ee xeerka WAC, oo ay ku jiraan da'da ugu yar, shuruudaha waxbarasho iyo heerka dabagal ku samaynta

[Xeerka WAC 0105 Shuruudaha Shaqada Kahor](#): waxaa uu sharaxaa waxa ay tahay in uu sameeyo bixiyaha barashada hore ee carruurta la shaqeynaya, oo ay ku jiraan hanuuninta, baaritaannada asalka iyo baaritaannada cudurka qaaxada (TB).

[Xeerka WAC 0106 Shuruudaha Tababarka](#): waxaa uu sharxayaa tababarka looga baahanyahay bixiyaha adeegga barashada hore in uu qaato oo uu ku dhammeysto muddo saddex bilood gudahooda ah marka la shaqaaleeyo ka-dib iyo tababar kastoo badbaado iyo caafimaad ah ee sii socda, sida Hurdada Ammaanka ah.

[WAC 0107 Tababarka Shaqada Gudaheeda ah](#): waxaa uu sharxayaa shuruudaha tababarka sannadlaha ee bixiyayaasha adeegga barashada hore.

Waano deg-deg ah: eeg [Qeexidda xeerka WAC ee 0005](#) si aad u hesho liiska erayada iyo qeexidda lagu adeegsaday xeerka WAC oo dhan, sida tababarka "shaqada gudaheeda" (saacadaha STARS) iyo "diiwaanka shaqaalaha ee elektarooniga ah" (MERIT).



Macluumaadka ku saabsan Shuruudaha Shaqaalaha ee La Cusbooneysiyyey ee La heli karo

Waxaad heli kartaa guud marka shuruudaha shaqaalaha ee la cusbooneysiyyey (shuruudaha waxbarashada iyo tababarka) ee ku qoran buugga hagaha ee Jaan-gooyooyinka Tayada Aasaasiga ah ee Barashada Hore. Qaybta horumarinta xirfadeed, tababarka iyo shuruudaha (qaybta labbaad ee buugga hagaha) waxaa ka mid ah shaxan soo socda:

- Shuruudaha shaqaalaha ee guud (shuruudaha da'da ugu yar iyo waxbarashada) oo la socda waqtiga dhammeynta ee door kasta
- Shuruudaha tababarka (shaqada ka hor iyo shaqada gudaheeda) loogu talagalay door kasta
- Waqtiga dhammeynta tababarka



- Shaxda u dhigma (waxaa ay taxaysaa liiska digriiyada beddelka ah, shahaadooyinka iyo cadaymaha kale ee buuxiya shuruudda waxbarasho)

Online-ka ka hel Buugga Hagaha Jaan-gooyooyinka Tayada Aasaasiga ah ee Barashada Hore: [English](#) | [Isbaanish](#) | [Soomaali](#) | [Ruush](#)

Waano deg-deg ah: daabac [Liisto-hubineedyada Doorka](#) ee qaybta horumarinta xirfadeed, tababarka iyo shuruudaha si xirfad miiran ah oo lagula socon karo horumarkaaga ku saabsan ka soo bixidda shuruudaha.

Waa maxay U-dhigma?




Xeerka WAC ee la cusbooneysiyeey wuxuu u oggolaanayaa bixiyayaasha barashada hore in ay ka soo baxaan shuruudaha shaqaalaha iyaga oo adeegsanaya wax u dhigma oo ay waaxdu aqoonsantahay. Kuwa u dhigma waxaa ka mid ah cadaymo ay waaxdu aqoonsan tahay iyo muujinta aqoonta iyo kartida xirfadeed.

Cadaymaha Beddelka ah: eeg “Shaxda U-dhigma” ee qaybta labaad ee Jaan-gooyooyinka Tayada Aasaasiga ah ([English](#) | [Isbaanish](#) | [Soomaali](#) | [Ruush](#)) ee Barashada Hore si dib-u-eegis loogu sameeyo digriiyada, shahaadooyinka iyo cadaymaha kale ee ka soo baxa aqoonta looga baahan yahay shaqaalaha.

Muujinta aqoonta iyo kartida xirfadeed: geeddi-socodkan waxaa uu bixiyayaasha u oggolaanayaa in ay ka soo baxaan aqoonta looga baahan yahay shaqaalaha iyaga oo muujinaya aqoontooda iyo xirfadahooda. Geeddi-socodkan weli waxaa ku socda horumarin—la soco si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Waa maxay Tababarka EQEL?



Sii-wanaajinta Tayada Barashada Hore (EQEL) waa tababar cusub oo loogu bahanyahay inta baddan doorarka (kuwa haysta shatiyada guriga qoyska, agaasimeyaasha xarunta, agaasimo ku-xigeennada, kormeerayaasha barnaamijka, macallimiinta horseedka ah iyo macallimiinta kaaliyayaasha ah) oo bixiya macluumaad ku saabsan deegaanka, isdhexgalka iyo daryeelka dhaqan ahaan waxtar leh. Tababarkan oo 20-saacadood ah waa in lagu dhammeeyo 36 bilood

gudahooda ka-dib marka qofka lagu shaqaaleeyo xarun shatiyeysan ama rukhsadaysan. Saacadaha EQEL waxaa lagu tirin karaa 10 saacadood ee tababarka shaqada gudaheeda ah (saacadaha STARS) ee sida sannadlaha ah loogu baahanyahay.

Kooxda horumarinta xirfadeed waxaa ay la shaqeynaysaa Gaarayaasha Guusha ee Hore, Hore u Bilaabidda (Head Start) iyo Barnaamijka Gargaarka iyo Waxbarashada Xannaanada ah ee Carruurta Yaryar (ECEAP) si loo go'aamiyo ikhtiyaarada kale ee ay waaxdu aqoonsatay ee ka soo bixi kara shuruudda Sii-wanaajinta Tayada Barashada Hore. La soco si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

10-ka saacadood ee ugu horreeya taxanahan tababarka waxaa la heli doonaa Sibtembar 2019 10ka saacadood ee labaadna waxaa la heli doonaa Maarso 2020. Bixiyayaasha barashada hore waxaa ay heli doonaan doorashada ay si shakhsi ahaan ah ugu buuxin karaan Af Ingiriis, Isbaanish iyo Af Soomaali, iyo online-ka Ingiriis iyo Isbaanish. Oo ha ilaawin: dhammeynta taxanahan waxaa loo xisaabi doonaa shuruudahaaga tababarka shaqada gudaheeda ah (Saacadaha STARS).

Su'aalaha WAC-La-Xiriira?

Eeg qaybta [Su'aalaha Inta Badan La Isweyddiyo ee WAC](#) ee mareegtada DCYF.

Haddii aadan arkin su'aal, ku soo dir iimaylkan dcyf.wacqanda@dcyf.wa.gov.



Dhinaca Bulshada



Aad iyo aad ayay muhiim u tahay in aan hubinno in dhammaan bixiyayaasha u baahan in ay ka soo baxaan shuruudaha tababarka in ay guulaystaan marka ugu horreyso sidaa daraaddeed ayaa waxaa ay inta baddan waqtigooda ku bixin doonaan in ay diiradda saaraan carruurta. –Nora Terrones

La kulan Melanie White Gómez iyo Nora Terrones kuwaas oo labbaduba taageera majaalka barashada hore waxaa ayna gargaar Af Isbaanish oo toos ah siiyaan bixiyayaasheenna Latinx. Waxaa ay iska kaashanayaan adeegyada taageerada ee ay siiyaan bixiyayaasheenna.

Waxaan Doonaynaa in Aan War Ka Helno Majaalka

Fadlan soo dir sawirro, waxyaabihii ku soo kordhay ama wararka xiisaha leh ee la xiriira PD waxaanna lagu soo bandhigi doonaa Warsidaha bisha Juun ee PD. Ku soo dir macluumaadkaaga marlene.white@dcyf.wa.gov.

Turjumaadyada majaalka

Kooxda PD waxaa ay ka shaqeysaa mashaariic baddan oo sida caadiga ah loo turjumo Afafka Isbaanish iyo Soomaali. Miyaad la kulantaa erayo aan wax macno ah sameynin ama si fiican aan loo turjumin?

Fadlan noo soo sheeg. Waxaan ka shaqeyneynaa in aan sameyno eray-bixinta erayada si ay arrintan gacan uga gaystaan.

Erayo kasta u soo dir marlene.white@dcyf.wa.gov.




Bartayaasha Labbada Luuqadood Ku Hadla (DLLs)



Hindiso Sharciyeedka Aqalka 1445 ee ku saabsan labbada luuqadood (DL) ee barashada hore ayaa la meel-mariyay oo noqday sharci bishii Luulyo 2017 waxaa uunna DCYF ugu baahanyahay in ay 1) kala shaqeyso la-hawl-galayaasha bulshada in ay taageeraan gaaridda iyo waxbarashada dheefaha barashada DL (DLL), 2) abuurto tababarka iyo kheyraadka PD iyo 3) taageerto macallimiinta iyo tababarayaasha.

Tan iyo markii la bilaabay, shaqada DLL waxaa ay ahayd mid si aad ah ay bulshada u wado oo bulshadu ay xog-ogaal u tahay, iyada oo isu keenaysa bixiyayaasha, qabiilada Gobolka Washington, tababarayaal, ururrada bulshadakusaleysan, Xafiiska Maamulaha Waxbarashada Dadweynaha (OSPI) iyo sidoo kale dadka xiiseeya luuqadda.



Tababarka waa la diyaariyey waxaanna hadda ku socda muraajaco waxaanna hadda ka shaqeynaynaa dhawr dadaallo oo ku saabsan gaaridda, ka-qaybgalka qoyska iyo war-isgaarsiinnada.

Ma xiiseyneysaa inaad qaadato Tababarka DLL?

Taxanaha tababarka DLL waxaa la heli doonaa bartamaha ilaa dabayaaqada bisha Abriil 2019.

Taxanaha DLL waxaa uu bixiyaa 12 saacadood oo STARS ah haddii si buuxda loo dhammeeyo.

Si aad u hesho tababarka, guji "Hel Tababarka/Find Training" ee [MERIT](#). Marka aad meesha gasho, raadi:

- Dual Language Learners - A Training for Early Learning Professionals
- Dual Language Learning - Community of Practice and Capstone



Shirweynihii Barashada Hore ee Qabiilka, 30-31 Maajo, 2019



LUMMI NATION
TREATY OF 1855

May 30-31, 2019

Silver Reef Casino
Ferndale, WA

ekwost isuwa xechngi'ng
– Teach with Purpose

For more information and to register go to:
www.surveymonkey.com/r/QSDQ7MT

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF), oo kaashanaysa Qaranka Hinddida ee Lummi iyo Xafiiska Head Start, waxaa ay ku faraxsan tahay in ay ku dhawaaqdo diiwaangelinta Shirweynaha Luuqadda ee soo socda in ay furan tahay.

- [Akhri waraaqada](#)

[daabacan](#)

- [Diiwaangeli ka-qaybgalayaasha](#)

Macluumaadkan waxaa sidoo kale laga heli karaa mareegtada DCYF ee hoosta [Xiriirada Qabiilka](#).

RBPD: Horumarinta Xirfadeed ee Xiriirka-Ku Saleysan

Ma maqashey RBPD ama Horumarinta Xirfadeed ee Xiriirka-Ku Saleysan? Waxaan ku guda jirnaa



geeddi-socodka muraajaceynta karti-xirfadeedda RBPD ee bixiyayaasha barashada hore.

Hagahan waxaa uu bixin doonaa macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay kuwa taageero bixiyayaasha iyada oo loo marayo barashada xiriirka ku saleysan. La-soco: Karti-xirfadeedda RBPD ee la muraajaceeyay waxaa la heli doonaa xagaagan.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dadaalkan dib uga soo eeg [Mareegtadeenna Waxaan Taageeraa Bixiyayaasha Barashada Hore.](#)



Kaydso Taariikhda loogu talagalay Fursadaha Barasho

Kooxda PD waxaa ay qabanaysaa shirarka fiidiyowga ee sida tooska ah baraha internet-ka looga tebiyo oo iskaashi leh **Talaadada saddexaad ee bil kasta** inta ka harsan sannadkan. Bil kasta, waxaan diiradda saari doonaa mowduucyo kala duwan waxaanna waqti hore sii-deyn doonaa macluumaadka shirarka fiidiyowga ee sida tooska ah loo tebiyo.

- **Maajo:** Talaado, 21ka Maajo
- **Juun:** Talaado, 1ka Juun
- **Luulyo:** Talaado, 16ka Luulyo
- **Agoosto:** Talaado, 20ka Agoosto
- **Sibtembar:** Talaado, 17ka Sibtembar
- **Oktoobar:** Talaado, 15ka Oktoobar 15
- **Nofembar:** Talaado, 19ka Nofembar
- **Disembar:** Talaado, 17ka Disembar

Shirarka fiidiyowga ee sida tooska ah loo tebiyo ee diiradda saaraya MERIT waxaa looga hadli doonaa adeegsiyada kala duwan ee MERIT, sida xaqijinta waxbarashada, tuuqsiga goobta tas-hiilaadka, diiwaanka xirfadeed iyo waxyaabo kale oo badan.

Warsidayaasha iyo Shirarka Fiidiyowga ee Sida Tooska ah Baraha Internet-ka Looga Tebiyo (Webinars)

Liis dhammeystiran oo ah dhammaan warsidayaasha PD iyo shirarka fiidiyowga ee sida tooska ah baraha Internet-ka looga tebiyo (webinars) ayaa laga heli karaa [Mareegtadeenna Warsidayaasha iyo Shirarka Fiidiyowga ee Sida Tooska ah Baraha Internet-ka Looga Tebiyo \(Webinars\).](#)




Sidee Nahay?

Fadlan noo sheeg sida aannu nahay ama bixi talo-soojeedimo adiga oo qaadanaya sahankan.

Fadlan oggow: *sahanka in uu yahay Af Ingiriis.*

[Qaado sahan halkan!](#)



Ku Xirnow



Si laguugu daro liiska rukumashada Warsidaha PD ama si aad u maareyso rukumashadaada, fadlan Marlene White ugu dir iimaylkan marlene.white@dcyf.wa.gov.